MINNEAPOLIS PUBLIC SCHOOLS
Urban Education. Global Citizens.

Section 504 Guide for Parents

Frequently Asked Questions

Waa maxay "Section 504 of the Rehabilitation Act"?

"Section 504 of the Rehabilitation Act" waa qaynuun fadaraali ah kaasoo mamnuuca takooridda ka dhanka ah shakhsiyaadka naafada ha oona u balanqaado naafada waxbarasho dadweyne oo lacag la'aan ah. Ardayda naafada ah waa in loo ogolaadaa fursadaha adeegyada waxbarasho oo ay helaan ardayda kale oo focooda ah. Qaynuunkan wuxuu si isku mid ah adeegyo waxbarasho u siiyaa ardayda naafada ha, kuwa dhiman iyo kuwa ay daawada u socoto.

Sidoo kale, Section 504 wuxuu mamnuucaa dhibaateynta qof naafo ah ama caqli dhiman, in laga aarsado, in la cabsiiyo ama in loo hanjabo markii ay bixiyaan dacwo ku salaysan takoorka ama yasitaanka shakhsiyaadka cuurayaanka ah ama kuwa caqligooda dhimanyahay.

Section 504 waxay adeegyo guud siisaa ardayda ku jira waxbarashada guud. (Section 504 ma bixiyo adeegyo gaar ah.)

Waa maxay Waxbarashada Gaarka ah ama Xeerka Waxbarasha Shaqsiyaadka Naafada? (What is Special Education or the Individuals with Disabilities Education Act (IDEA)?)

IDEA waa qaynuun fadaraali ah oo oggolaada bixinta adeegyada Waxbarashada Gaarka ah (Special Education). IDEA waxay ardayda cuuryaamiinta ama kuwa maskadoodu aysan dhamaystirneed siisaa addegyo waxbarasho iyo adeegyada la halmaala waxbarashada. Waxaa intaa dheer, qaynuunkan wuxuu u oggolaadaa adegyo ardayda ku jirta waxbarashada guud iyo mida gaarka ah.

Waa maxay shuruudaha loo baahan yahay si loo helo Qorshaha Waxsiinta Shakhsiga [504 Individual Accommodation Plan, (IAP)]?

<u>Sadex Walxaad</u>

Qufka u qalma adeeg yadaan waa (1) cuuriyaan ama maskaxdiisu yar dhiman tahay (2) waxna qabsan karin (3) aan dhaqdhaqaaqi karin (major life activities). Sedexdaan arrin oo dhan waa inuu shakhsiga qabaa. Haddii uu ardaygu yahay cuuriyaan ama maskaxda loogu yar jiro waa in la cadeeyaa markuu qofka codnasaayo adeegyada.

<u>Sidee Section 504 u qeexaa cuuriyaanimada iyo cudurka maskaxda?</u>

Sharci dajiyaasha Section 504 ee 34 C.F.R. 104.3(j)(2)(i) waxay u qeexaan cuuriyaan nimada iyo madax xanuunka in ay yihiin jiro xaga madaxa ah, oo saameysa maskaxda, murqaha, dareemada, neefsashada, hadalka, dheefshiidka, iyo dhibaatoonin xaga wax barashada.

Waaxda Waxbarashada U.S., "Su'aalaha had iyo goorba dadku isweydiiyaan oo ku saabsan Section 504 iyo waxbarashada caruurta ee curyaamiinta ah iyo kuwa caqligooda dhimanyahay."

Xaddidaadda Faro badan

Xafiiska Xuquuqda Madaniga (The Office of Civil Rights) ma aqbalo mana sameeyo qiyaas ku aadan xaddidaadda faraha bada. Waxaa gooyo go'aanka dad ku xeel dheer arimahaan markuu qof codsado adeegyada.

"Cuuriyaannimada ama jirada madaxa ma'ahan inuu gaarsiisanyahay heer uu qofka ka hor istaago waxyaabaga ugu waa weyn ee nolosha."

Waaxda Waxbarashada U.S., "Su'aalaha had iyo goorba dadku isweydiiyaan oo ku saabsan Section 504 iyo waxbarashada caruurta ee curyaamiinta ah iyo kuwa caqligooda dhimanyahay."

Hawlaha Nolosha ugu Waaweyn

Qufkoo wax qabsada	Ku shaqaynta gacmaha	Fooraarsi
Araga	Hadalka	Socod
Maqalka	Neefsashada	Istaag
Barashada	Diiradsaarid	Qaadis
Fakarka	Cunidda	Hurdo
Aqrinta	Xiriiridda	Shaqo

Liiska shaqooyinka jirka oo hadda loo tixgaliyo inuu qatar ku yahay howlaha ugu waawayn nolosha waxaa ka mid ah: hawlaha habka difaaca jirka, koritaanka unugyada, dheefshiidka, saxarada, kaadi haysta, dareemayaasha, maskaxda, neefsashada, dhiigga, hormoonada jirka iyo hawlaha taranka.

Waaxda Waxbarashada U.S., "Su'aalaha had iyo goorba dadku isweydiiyaan oo ku saabsan Section 504 iyo waxbarashada caruurta ee curyaamiinta ah iyo kuwa caqligooda dhimanyahay."

Waa maxay habka aqoonsiga?

Gudbin

Codsashada dib u eegista baahida ardayga wuxuu ka imaan karaa ilo kala duwan. Kalkaalisada caafimaadka ee iskuulka ayaa laga yaabaa in ay ogaato xaaladaha caafimaad ee ardayga. Waalidka ama shaqaalaha dugsiga ayaa soo jeedinkara cabashooyin, hadal ama iyada oo loo marayo adeegsiga Warqada Gudbinta (Referral Forms): http://speced.mpls.k12.mn.us/documents_for_parents.html Foomamka Gudbinta waa in loo diraa Iskuduwaha Building 504. Mararka qaarkood, ardayga waxaa gudbiyo RTI ama kooxda Waxbarashada Gaarka ah (oo ay ku jiraan waalidka) marka arday loo qiimaynayo Waxbarashada Gaarka ah, laakiin muusan buuxin shuruudaha xaq u yeelashada.

Waalidka waxey la soo xiriiri doona Iskuduwaha Hawsha Building 504 ama Maamulaha 504, kuwaas oo dib u eegi doona walaaca, oona dulmari doona Section 504 ee Sharciga Dhaqan-celinta, siina doona Notice of Rights.

Qiimaynta Qufka

Ardayga waxaa lugu aqoonsadaa qaab weydiineed ama qiimeyn (individual inquiry/an evaluation). Waalika waa inuu siiyaa ogolaansho (af ama qoraal ah) ka hor inta ay qiimeynta bilaabaan.

Go'aaminta U-qalmitaanka

Waxaa habboon in dugsiga la keeno cadayn caafimaad ee shakhasiga naafada ah. Qufka ogaanayo cudurka naafada waa in uu yahay dhakhtar caafimaad, qofbartay cilmi nafsiga ama caafimaadka maskaxda — waxaana habboon in cadaynta la soo gudbiyo saddex sano gudahood markii laqaaday qiimeynta 504.

Xogta loo isticmaalo qiimeynta waa in laga helay ilo kala duwan, waxaana kamid noqonkara dib u eegis diiwaan caafimaad oo horay u jiray, diiwaanka waxbarasho ee hadda jira, dhibcaha imtixaanka iyo/ama qiimeynta aqoonta dadka madaxa xanuunayo, iyo talooyinka macalimiinta/shaqaalaha, iyo wareysi lala yeesho waalidka iyo/ama arday. Xusuusnow, ma aha cadayn-caafimaad oo kaliya in dadka cuurayaaniinta ama kuwa madaxa xanuunayo go'aamisa xaq u yeelashada, xogta waa in ay ka imaataa ilo kala duwan iyo waa in naafada ama madax xanuunka u saamayso shakhsiga si xoogan.

Marka ogolaansho la siiyo qiimeynta, waa dhaqanka wanaagsan in ay kooxda dugsiga dhameystirto qiimeynta 30-maalin gudahood iyo in ay dib u eegaan natiijooyinka waalidka. Kooxda waxaa ka mid ah waalidka, ardayga, haddii ay haboon tahay, iyo dadka dugsiga ama Dagmada oo yaqaan ardayga iyo/ama kuwa fahmaan macnaha xogta la soo uruuriyay iyo/ama kuwa ogaankara fursadaha loogu talagalay hoy ku salaysan naafanimada iyo waxay u baahan yihiin. Kulankan kooban, kooxda waxay dib u eegi doonaan xogta iyo waxyaabaha uu xaqa u leeyahay qofka, si ay wadajir u go'aamiyo u-qalmitaanka.

Waa maxay habka loo qoro Qorshaha Waxsiinta Shakhsiga [Accommodation Individual Plan (IAP)]?

Waqtiga

Haddii la ogaado inuu ardaygu xaq u leeyahay adeegyada Section 504, tallaabada xigta waa in la go'aamiyo haddii uu u baahanyahay Accommodation Plan (IAP). Haddii ay sidaas tahay, kooxda ayaa dib u eegi doona baahida ardayga waxayna u qori doontaa waraaq si uu uga helo adeegyo qaas ah goobaha waxbarasho. Sidoo kale, kooxda waxay dib u eegi doontaa hadii uu canuga u baahan yaha caawin ku aadan imtixaanaadka dagmada iyo gobalka. (Ardayda aan u

baahanayn adeegyo gaar ah markii ee fasalada ku jiraan ma heli doonaan adeegyo gaar ah markii ay qaadanayaan imtixaanaadka degmada iyo gobalka.

Oggolaansho

Waalidiinta ka qayb qaadanayo IAP waxay bixinayaan oggolaansho. Iyadoo sidaa tahay, MPS waxay waalidiinta siindoontaa ikhtiyaa afk ah ama qoraal ah oo ay oggolaansho ku bixiyaan. Oggolaanshaha afka, qorshaha islamarkiiba wuu guda gali doonaa, markii uu maamulaha 504 uu u gudbiyo dadka meelmariya—arintaan waxay qaadan doontaa 10 maalmood. Oggolaanshaha qoraalka ah, qorshaha waxaa loo diri doonaa waalidka/mas'uulka 10 maalin gudaheeda, wuxuuna dhaqan gali doonaa markuu waalidka u soo celiyo maamulaha 504 foomka IAP oo saxiixan.

Dib u eegista iyo muraajaceynta IAP

IAP-yada dib ayaa loo eegaa sanad kasta. Dib u eegistaan waxay ku dhicikartaa qaab fool ka fool ah, iimeel ahaa ama telfoonka. Si kastaba ha ahaatee, qorshooyinka loo arko inaysan shaqeenaynin ama qorshayaasha loo qoondeeyay ardayda daawooyin kooda ama baahidooda xaga madaxa aad isku badashay waa in dib u eegid dag dag loo furaa.

Maxaa ku boxo IAP (oo loo yaqaanno "504 Plan")

IAP waxay diyaarin doontaa caawimaadyo (geedi socodka waxbarashada iyo/ama barnaamijyada Degmada, hawlaha iyo adeegyada) oo ardayda u ogolaan doona inay helaan waxbarashada ardayda lamidka ah oo aan naafo ahayn.

Warxbarasho haboon oo lacag la'aan ah [Free and appropriate education (FAPE)] waa in la hubiyo inay ardayda helaan. Tan waxaa ka mid ah xuquuqda ardayda ay wax kula bartaan kuwa kale oo aanan naafada ahayn ama madaxa looga jirin.

Sidee arday leh 504 u heli karaan taageero xagga dhaqanka (behavioral support)?

Codsashada waxaa loo qori karaa si wax looga qabto baahida habdhaqanka gaarka ah. Ardaygu wuxuu heli karaa qorshe qaas ah si looga taageero habdhaqan kiisa/keeda. Qof walba oo masuul ka ah inuu meel mariyo IAP-ga ardayga wuxuu heli doonaa koobi, wuxaana laga rajay nayaa inuu raaco qoraallo cayiman.

Sidee ardayda qabta 504 IAP loo edbiyaa?

Ardayda qabta IAPs waxaa waajib ah in la mariyo Sharciga Anshaxinta Magaalada Guud ee Minneapolis Public Schools. Haddii la ganaaxo (iskuulka laga ceyriyo) ardayga loo tixgeliyo inuu yahay 504, maareeyaha 504 waa in lala tashtaa.

Haddi ardayga la ganaaxo 10 maalin oo isku xiga ama guud ahaan 10 maalin la ganaaxo, waa in kooxda 504 qabtaa kula loo yaqaano "Manifestation Determination."

Iskuduwaha 504 ee degmada waa in looga yeeraa kulanka. Waa in shaqo-guri (homework) oo la kor meerayo la bixiyaa, iyadoo laga bilaabayo maalinta lixaad ee ganaaxa.

Haddi arday ah 504 IAP loo go'aamiyo in dugsiga laga badalo ama la ceyriyo, waa in ay kooxda Manifestation Determination qabtaa kulan maalinta 6-aan ee ganaaxa. Iskuduwaha 504 ee degmada waa in looga yeeraa kulanka.

Maxay yihiin Tallaabooyinka Illaalaynta?

Markii loo fiiriyo Section 504, waalidka waxey xaq u leeyihiin:

- Inay helaan ogeysiiska ku saabsan aqoonsiga, qiimaynta, iyo meeleynta ilmahooda
- Inay helaan ogeysiis hore markii iskuulka loo beddelayo ama laga joojinayo adeegyada loogu talagalay ilmahooda
- Si markale loo eegto diiwaanada ilmahooda
- Inay ka qayb galaan kulanka maqalka iyo dib u eegista, iyadoo laga yaabo inay wakiillo lataliyo yaal ah joogaan ama eysan joogin

Tallaabooyinka Illaalaynta waxay ku qoran yihiin Ogeeysiinta Xuquuqda (Notice of Rights), oo ku qoran af-Somalí, Hmong iyo Spanish, waxaad ka heli kartaa link-gaan: http://speced.mpls.k12.mn.us/documents_for_parents.html

Sidee loo dalbadaa cabasho?

Minneapolis Public Schools waxay ku baaqaysaa in dhammaan cabashooyinka lagu xalliyo iyadoo lala hadlayo dadka ugu dhow arrinta, inta badan Maamulaha Section 504, Iskuduwaha Building 504 iyo/ama maamulaha dhismaha ardayga. Haddii ay arintaan shaqayn weyso, waalidka wuxuu la xiriiri karaa Iskuduwaha 504 ee dagmada, Amber Spaniol Director, Nursing Services, si ay wax uga qabato xallinta arimahaan. Waxaad Jenny kala xiriiri kartaa 612/668-5343 ama email-ka amber.spaniol@mpls.k12.mn.us.

Waalidka wuxuu xaq u leeyahay dalbasho cabasho waqti kasta. Wuxuu u caban karaa Iskuduwaha Degmada 504, Xafiiska Xuquuqda Madaniga (Office of Civil Rights) ama Waaxda Xuquuda Admiga Minnesota (Minnesota Department of Human Rights). Fadlan eeg habsocodka rasmiga ah ee cabashada Section 504, (Formal Grievance Procedure for Section 504) taas oo ku turjiman luqadaha afka Somaliga, Hmong-ha iyo Spanish-ka. Waxaad ka heli kartaa halkaan: http://speced.mpls.k12.mn.us/documents_for_parents.html

Yaan la xiriiraa si aan faah-faahin dheeraad ah ugu helo Section 504?

Iskuduwaha Section 504 ee dagmada, Amber Spaniol, ayaa ku faraxsan inay su'aalahaaga ka jawaabto. Intaa waxaa dheer, goob waliba wuxuu leeyahay iskuduwe; liiska magac yada waxaa ka heli kartaa website-ka, qaybta "Student Support Services" hoosteeda oo ku qoran "Section 504":

http://speced.mpls.k12.mn.us/resources.html